

JIMICSIYADA DARDAR- GELINTA MASKAXDA 2



MASHRUUCA
ETNIMU

HORUMARINTA CAAFIMAAD
MASKAXEEDKA DADKA
DUQOBAAYA EE AJNABIGA AH



JIMICSIYADA DARDARGELINTA
MASKAXDA 2

Hagahan waxaa loo sameeyey mashruuca ETNIMU, kaas oo loogu talagalay horumarinta caafimaad maskaxeedka dadka duqoobaaya ee ajnabiga ah. Mashruuca waxaa maalgeliyey STEA.
Sii aqri: www.muistiasiantuntijat.fi/etnimu

DAABACAAD:

Uuruka khaburada xasuusta ee Finnishka (Suomen muistiasiantuntijat ry)

KOOXDA WADASHAQEYNTA:

Siiri Jaakson, Maareeyaha mashruuca, ETNIMU
Anu Jonuks, Tababaraha xasuusta
Urve Jaakkola, isuduwaha mashruuca, ETNIMU
Batulo Essak, turjumaad
Tiina Auer, sawirada, hindisaha naqshadeynta

TAXANAHA:

Daabacaadaha Suomen muistiasiantuntijat ry
ISSN 2343-2489
Julkaisu 13/2017
ISBN 978-952-7227-16-9 (nid)
ISBN 978-952-7227-15-2 (pdf)

DALABKA:

Suomen muistiasiantuntijat ry
Fredriksberginkatu 2
00240 Helsinki
Puh: (09) 454 28 48
Email: info@muistiasiantuntijat.fi
www.muistiasiantuntijat.fi

MACLUUMAADKA TIXRAACA:

Jaakson S., Jonuks A., Jaakkola U.
Batulo Essak, turjumaad qoraal
Jimicsiyada dardargelinta maskaxda 2.
Suomen muistiasiantuntijat ry, daabacaada 13/2017.
Helsinki: Paintek Pihlajamäki Oy, 2017.

Jimicsiyo farxad u leh dardargelinta maskaxda

Buug-hagehaan idinka ayaa la idiin qoray, hagayaasha kooxaha, kuwaas oo horumarinaaya noloshada dadka waayeelka ah ee Finland degan. Buug-hagehaan waxaad ka helaysaa 26 tababar kala duwan ee dardargelinta maskaxda. Jimicsiyadan iyo tababaradan waxaad ka sameyn kartaa tababaro cusub oo aad siin kartid kooxdaada.

Tababar siinta maskaxda waa hab cusub oo lagu horumariyo caafimaadka maskaxda. Qofka kasta oo naga mid ah wuu horumarinkaraa shaqada maxkaxdiisa. Ma jiro xusuus xun ama mid fiican. Xasuusteena si xulasho leh ayey u shaqey-saa iyadoo dalbaneysa waxa ay xiiseynayso. Markaa sameynayno tababarka foajignaan iyo ka fiirsashada, waxaan gelin karnaa arimo kala duwan xasuusteena angoo isticmaalayna dareenka.

Habka ugu sahlan ee xasuusta loogu foajignaan dohowsha aad sameynaysid, waa in la horumariyaa nidaamka shaqada, hal abuurka iyo mala-awaalka. Tababar siinta maskaxda lagama fekeri sida wax loo xasuusto, ee waxaa la hormariyaa isticmaalka xasuusta, markaas oo la helo xiriirka ka dhexeeya waxa la xasuusanaayo iyo wixii horey loo ogaa. Markuu qofku helo xiriirkaas, iyo sidey isu leeyihiin ayey u sahlantahay inuu xasuustiisa ku keydiyo arimo cusub.

Tababar siinta jirka wuxuu keenaa caafimad jireed, sidoo kale tababarka xasuusta waa muhiim faa'iido badana leh. Markaad sameynaysid tabarka iyo jimicsiga maskaxda kartida ruuxda way sii hagaagta. Tababarada buug-hagehaan si madax banaan/keligaa ayaad u sameyn kartaa, laakiin kooxda waxaad ka helaysaa farxada wadajirka taas oo keenta niyad wanaagsan iyo dareen wadajir ah.

Jimicsiyadan waxaa loo diyaariyey, looguna talagalay in lagu isticmaalo hagida tababarada kooxda: ka wada haladka mowduucyo la soo doortay, erayo lagu cayaaro, gacanta oo wa lagu qabto (tusaale ahaan. midabayn) iyo ku darid howlo cusub. Waxaad isla sameyn kartaa tababaradan iyo jimicsiyada, si saacada jimicsiga ay u noqoto firfircooni kala duwan leh.

Jimicsiyo farxad u leh dardargelinta maskaxda

Siiri Jaakson, Anu Jonuks iyo Urve Jaakkola

Xusuustu kuma dhamaato isticmaalka, ee waa bilcaksi!

Ku socoto hageyaasha

- Hubi dhaqdhaqaaqa islamarkaana baro intaadan kooxda u tegin.
- Si fiican u tus jimicsiga, ku cel-celi haddii loo baahdo
- Tababarkasta waxaa loo sameeyey mowduuc gaar ah, kaas oo wax lagu dari karo haddii loo baahdo. Ka qeybgal cayaarta
- Ku xisaabtan heerka kooxda. U raadi xal kooxda dhan ku haboon
- Ku dhiiri geli qofkasta inuu ka qeybgalo, markay bilowga ku adkaato.
- Tartan ha ka abuurin kooxda dhexdeeda!
- Dhammaan natiijooyinka waxay mudan yihiin dhiirigalin
- Kooxda dhexdeeda ka wada hadla sida saxda ah oo loo xaliyo tababarkan
- Xalinta tababaradan iyo jimicsiga waa inuu noqdaa mid farxad leh, maxaa yeelay qosolku wuu fiicanyahay!
- Ka feker dhaqamada kala duwan ee kooxda.
- Kulan kasta ee kooxda sameeya hal tababar/jimicsi


Waxaad ka daabacan kartaa waraaqaha tababarka bogga internetka: www.muistiasiantuntijat.fi/etnimu

- Ka qeybgalayaasha waxay qaadan karaan waraaqaha tababarka si ay usii bartaan/ugu cel-celiyaan xalinta tababarka.

Waxaan ku talinaynaa in tababaradan loo sameeyo koox ahaan. Haddii aad keligaa sameyneysid si taxadar leh u raac tilmaamaha!

Cirka habeenkii







U sii wad sawirida calaamadaha sidey iskugu xiggaan. Sawirkii lagu qorayaa halka calaamad su'aalka ku taallo?



- Ma taqaanaan xiddigaha?
- Xasuuso ereyo ku saabsan habeenka.
- Ma garatay geedaha sawirka habeenka laga arkayo?

Dambiil qudaar

Qudaar walba waxay u dhigmataa hal lambar. Qudaar walba ama labmar walbana waxaa la dhigi karaa qaanad layn taagan, jiifa ama dadab ah. Qaanada ku qor lambar ama ku sawir qudaar/miro.


	1			
	2			
	3			

- Sawirada midabee.
- Sheeg qudaarta/miraha, aad taqaano.

Jidka duleelka kubada



Baaqulige ayey kubadaha 1, 2, iyo 3 ku kala dhacayaan?



A





B

C

- Kooxda ku isticmaala kubado kala duwan (kubada stress-ka, kubada cayaarta iwm.).
- Sheega cayaaraha kala duwan ee lagu isticmaallo kubadaha.

Xayawaanka gurijooqta

Sawirada jarjaran ka samee bakayle iyo booloboolo.



- Midab is leh ku midabee waraaqaha jarjaran oo isku qaabka ah una isticmaal sameynta sawirka.
- Ka wada hadla xayawaanka gurijooqta ah.

Baakada cuntada





Baakada cuntada lagu qaato ee Liisa waa afargees leh xariijimo, laakiin ma laha meel laga qabsado. Baakadaas cuntada waxaa ku jira rooti subag marsan, laakiin dhalada biyaha kuma jirto. Waxaa ku jira oo kale tufaax iyo yugurti, shukulaatana kuma jirto. Raadi baakada cuntada ee Liisa.



- Midabee sawirada.
- Mowduucaan ka sheekeysta "idinkoo piknik banaanka ah jooga".
- Maxaad gelin laheyd baakadaada cuntada?

Dukaanka aan tagno!


Sawirada sidey isugu xigaan u dhig



- Midabee sawirada.
- Ka wada hadla aadida dukaanka, idinkoo isticmaalaya tusaale.
- Sidee baad u xasuusataa, wixii aad u baahneyd inaad dukaanka kasoo iibsato?

Tabakaayada hamburgerka







Ka raadi tabakaayadan laba hamburger oo isku mid ah.



- Midabee sawirka.
- Ka wada hadla cuntada caafimaadka leh.
- Cuntada caafimaadka leh waxay ka koobantahay.
- Sheega ama soo tiriya cuntooyin kala midab ah.

Qolofa ukunta


Sameynta doolshaha waxaa la isticmaalay afar ukun.
Qolfaha ukunta jabsan kuwee is leh?



- Qolfaha ukunta ee is leh isku midab mari.
- Fadlan qor cuntada, marka la sameynaayo la isticmaalo ukun.

Sawirka nus baa maqan


Sawir nuska ka maqan sawirka adigoo raacaaya godadka banaan.



- Midabee sawirka.
- Qora marka hore ubaxyada isku midabka ah, kadibna qora ubaxyada xarafka hore iskaga mid ah.

Xarafka T-da


Shayada sawirka ku yaal kuwee ka bilowda xarafka T?
Hal shay ayaa wuxuu yeelan karaa dhowr magac oo ka bilowda xarafka T-da.



- Midabee sawirka.
- Ka samee sawirka sheeko.
- Ku cel-celi howshan adigoo bedelaya Xarafka.

Ubax bokis ku jira


Isku day inaad bokisyada aad mid ka dhaqaaqdid oo kan kale u gudubtid adigoo raacaaya ubaxyada isku midka ah.



- Xusuuso ubaxyo isku si u carfa.
- Ubaxyada udgoon mid ka mid ah dhacdo la xiriirta xusuuso.

Ubaxa gu'ga ee wayn



Qoraxda gu'ga ubaxa aad ayey u korisay. Ka raadi ubaxan laanta xiddika galeysa.



- Midabee sawirka.
- Xusuuso ubaxyada gu'ga ugu horeeya.

Tubo biyo oo jaban


Roobabka dayrta ayaa dhaliyey in tubadu biyaha daadiso. Tubada hoosteeda waxaa la dhigay baaldiyo intuu ninkii tubada sameynayey imaanaayo. Laba dhibcood ayaan baaldiga ku dhaceyn ee waa kuwee?



- Roobka maxaan ka faa'iidnaa?
- Maxaad jeceshahay ama necebtahay markuu roobka da'ayo?
- Xusuuso dhacdooyin fiican oo ku saabsan roobka.

Qurxinta dariishada dukaanka



Saaxiib ayaa kaa caawinaaya qurxinta dariishada dukaanka. Kadib dhammeystir qurxinta dariishada, adigoo dhigaysa laynkiiba, jiif/taag ahba uu hal shay kaliya yaallo.







































- Midabee dukaanka hortiisa.
- Ka feker markii ugu dambeysay ee aad dukaan tagto. Maxaad ka soo iibsatay?

Cayaartooyda

U raadi sawirkaska oo la kala jaray kiisii kale oo dhammeystiran. Lambarka sawirka dhammeystiran ku hor qor kan la midka ah ee kala jaran.



A = <input type="text"/>	B = <input type="text"/>	C = <input type="text"/>	D = <input type="text"/>	E = <input type="text"/>	F = <input type="text"/>
					
G = <input type="text"/>	H = <input type="text"/>	I = <input type="text"/>	J = <input type="text"/>	K = <input type="text"/>	L = <input type="text"/>
					

1 	2 	3 	4 	5 	6 
7 	8 	9 	10 	11 	12 
13 	14 	15 	16 	17 	18 
19 	20 	21 	22 	23 	24 

- Fadlan qor noocyada cayaaraha.
- Qalab nooc ee ah ayaad cayaaraha u isticmaashaa?
- Waa maxay isboortiga aad jeceshahay?

Jihooyinka


Soo xasuusta jihooyinka kadibna ku qora kombaska. Aqri qoraalka kadibna ku qor qaanada sawir.


Bisha marka laga aado koonfur qorax ku sawir. Qoraxda koonfur-galbeedkeeda ku sawir il. Isha barigeedana ku sawir baaldi. Isha koonfur-galbeedkeeda ku qor xarafka M.

M-dana waqooyi-barigeeda waxaa yaala iskaalsho/sharabaado. Iskaalshada/sharabaadada galbeedkeeda waa dhalo. Dhalada koonfurteeda waa ubax.

Haddii aad si sax ah u dhigtay sawirka qaanadahooda, markaa laynka ugu hooseeya qaanadiisa bidix waa inay banaanaataa. Halkaas banaan ku qor magacaaga.

WAQOoy




- Midabee sawirada.

Nimanka qoryaha ah


U raadi sawirkasta midka la midka ah xariijina iskula xir.



- Labada isku midka ahba midabee.
- Sameeya qaabka istaaga ee idiin sahan.

Dayr






Raadi kala duwanaanshaha



- Midabee sawirada.
- Ka wada hadla beergosyka – miraha iyo geedaha la cuno, iyo sidoo kale geedaha kale (sida. koivut (Betula), tammi(Quercus robur), pihlaja (Rowan).

Sawirada xagaaga

Xagaaga sawiro badan ayaa la qaaday. Kuwani waa xasuus ka mid ah xafladii xaafada. Yaa qaaday sawirada? Baadh, meesha uu joogo sawir qaadaha iyo dadka uu sawirka ka qaaday.



- Midabee sawirada.
- Bilaaba erayo is bada jooga (qofka ugu horeeyo ha dhaho tusaale. QORAX, qofka ku xigga ha sheego eray ka bilaabmaaya, eraygii hore xarafkii ugu dambeeyay – sida tusaalahan X – XAGAA iwm.).

Safar

Waa cajaa'ib! Shandadaadii ama boorsadiidii ayaa qof kale ku qaldamay garoonka diyaaradaha! Raadi waxa ay ku kala duwanyihiin.





Sii wada oo sameeya boorso alaab lagu guraaya "boorso ayaan alaab gelinayaa".

- Qofka ugu horeeya shay ayuu magaciisa sheegayaa, kaas oo markuu safraayo qaato.
- Qofka xigga wuxuu sheegayaa magaca shayga boorsada la geliyey kadibna mid kale oo cusub ayuu gelinayaa. Sidaas ayaadna kusii wadeysaan.
- Midabee sawirada.

Qalimo

Raadi qalimada isku midka ah kadib ku qor lambarka hoostiisa xarfka ay is leeyihiin.




- Midabee waraaqaha.
- Fadlan qor sheeyo kala midab ah.
- Fadlan qor midabada aad jeceshahay.

Xisaabinta qanadaha

Ku soco qaanadaha adigaa raacaya tusaalaha. Ka bilow meesha la calaamadeeyey.



10 qaanad kor/ 1 qaanad bidix/ 2 qaanad hoos/ 1 qaanad bidix/ 2 qaanad hoos/ 1 qaanad bidix/
2 qaanad hoos/ 1 qaanad midig/ 2 qaanad hoos/ 1 qaanad midig/ 2 qaanad hoos/ 7 qaanad bidix/
1 qaanad hoos/ 2 qaanad midig/ 1 qaanad hoos/ 1 qaanad midig/ 2 qaanad hoos/ 8 qaanad midig/
1 qaanad kor/ 1 qaanad midig/ 1 qaanad kor/1 qaanad midig/ 1 qaanad kor/ 2 qaanad midig/
1 qaanad kor/ 6 qaanad bidix/ 1 qaanad kor/ 1 qaanad midig/ 2 qaanad kor/ 1 qaanad midig/
1 qaanad kor/ 1 qaanad midig/ 3 qaanad kor/ 1 qaanad bidix/ 2 qaanad kor/ 1 qaanad bidix/
1 qaanad kor/ 2 qaanad bidix.



- Midabee sawirka.
- Haddaad rabsid waxaad sawirika ku sameyn kartaa mar labaad warqad qaanado leh.
- Xasuuso erayada sawirka ku saabsan kadib sheeko ka samee.

Suuqa kudhacda



Suuqa kudhacda miiskiisa alaab ayaa la soo saaran. Maxay kala yihiin?



- Alaabta kala sooc.
- Isku day inaan xasuussato alaabta isku nooca ah.

Duulista shimbirta


Si taxadar leh u raac qaanad kasta kadibna ku koobiye shimbirta qaanadaha waaweyn.



- Midabee shimbirtii aad sawirtay.
- Waa maxay shimbiraha aad taqaano?
- Bilaaba erayo is bada jooga (qofka ugu horeeyo ha dhaho tusaale. TIAINEN, qofka ku xigga ha sheego eray ka bilaabmaaya, eraygii hore xarafka ugu dambeeyay – sida tusaalahan N – NORPPA iwm.).
- Gacanta ku sameeya habka ay shimbirta u duulayso.

Cayaarta falaarta


U soco dhinaca falaarta. Lambarkee ayaad tagtay



- Xubnaha kooxda mid mid ha u sheegaan lambarada 1, 2, 3, 4, 5... Lambarkasta oo shan ay ku jirto marka la sheego hal mar ayaa la sacbinayaa. Lambarka 2 tirooyinka uu ku jirana waa la gaardinayaa iyadoo la fadhiyo.
- Ku kordhiya dhaqdhaqaaqyo kala duwan lambarada kale.

Safarka baska


Sawirka waxaad ku aragtaa bas socda. Jihadee ayuu u usocdaa basku (midig mise bidix)?




- Jawaabtaada sharax.

Jawaabaha

1. Cirka habeenkii




2. Dambiil qudaar




3. Jidka duleelka kubadaa

Jawaab: 1=B, 3=B, 2=C

4. Xayawaanka gurijoogta




5. Baakada cuntada



6. Dukaanka aan tagno!

Jawaab: A=4, B=2, C=3, D=1

7. Tabakaayada hamburgerka



8. Qolofa ukunta

Jawaab: 1=C, 2=D, 3=A, 4=B


9. Sawirka nus baa maqan

Jawaab: Qof walba isagaa sawiraya


10. Xarafka T-da

Jawaab: Xarfaha ka bilowda T-da

11. Ubax bokis ku jira




12. Ubaxa gu'ga ee wayn



13. Tubo biyo oo jaban

Jawaab: 5, 13

14. Qurxinta dariishada dukaanka




15. Cayaartooyda

Jawaab: A=20, B=10, C=1, D=16, E=17, F=19, G=4, H=14, I=24, J=6, K=8, L=22

16. Jihooyinka



17. Nimanka qoryaha ah




18. Dayr



19. Sawirada xagaaga

Jawaab: A=3, B=4, C=6, D=2, E=1, F=5


20. Safar



21. Qalimo

Jawaab: 1=E, 2=D, 3=F, 4=C,
5=H, 6=G, 7=B, 8=A, 9=I



22. Xisaabinta qanadaha




23. Suuqa kudhacda



24. Duulista shimbirta



25. Cayaarta falaarta



26. Safarka baska

Jawaab: Bidix, sababtoo ah
albaabada basku waxay ku yaalaan
dhinaca midigta.



Hagahan waxaa loo sameeyey mashruuca ETNIMU, kaas oo loogu talagalay horumarinta caafimaad maskaxeedka dadka duqoobaaya ee ajnabiga ah.

